Degmo Dugsiyeedka Magaalada Westerville

Heshiiska La Socodka Heerka Sonkorta Dhiigga ee Joogtada ah ee Lagala soconaya Khadka (Remote Continuous Glucose Monitoring)

Sanad Dugsiyeedka: _____

Magaca Ardayga:_____Dugsiga:_____

Lambarka Ardayga:_____

Anigoo ah _____, waxaan codsanayaa in kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga iyo/ama shaqaalaha rugta caafimaadka ee tababaran ay la socdaan heerka sonkorta dhiigga ee ardaygayga, _____, inta lagu jiro maalinta dugsiga iyagoo adeegsanaya qalabka joogtada ah ee la socodka sonkorta dhiigga (CGM, continuous glucose monitor) (tusaale ahaan, Dexcom), **iyadoon lala joogin**, iyagoo adeegsanaya qalab degmada dugsigu leedahay oo yaalla xafiiska caafimaadka ee dugsiga ama ay isticmaalaan shaqaalaha dugsiga ee loo magacaabay.

Degmada Dugsiyada WCSD waxay tixgelin doontaa qodobadan soo socda iyadoo ku salaynaysa tilmaamaha hadda jira[1] *Ururka Sonkorowga Mareykanka (American Diabetes Association) ee ku saabsan la socodka CGM ee deegaanka dugsiga*, marka waalidka/masuulka uu codsado in xogta lala wadaago lana kormeero. Ujeeddadu waxay noqon doontaa in la maareeyo baahiyaha la xiriira sonkorowga, iyadoo isla markaana la dhiirrigelinayo fayo-qabka ardayga lana yareynayo carqaladaha aan loo baahnayn ee ku yimaada maalinta waxbarashada. Dugsigu wuxuu raaci doonaa Qorshaha Maareynta Caafimaadka Sonkorowga (DMMP) iyo amarrada bixiyaha daryeelka caafimaadka si loogu isticmaalo CGM la socodka heerka sonkorta dhiigga ee caadiga ah, xilliyada loo qorsheeyay, iyo xaaladaha degdegga ah, isla markaana wuxuu hubin doonaa in si degdeg ah looga jawaabo digniinaha CGM.

Fadlan si taxaddar leh u akhri qodobadan soo socda oo xarafka magacaaga hore (initials) ku saxiix:

_____Waxaan fahamsanahay in degmada dugsigu aysan mas'uul ka ahayn bixinta qalabka qaabila calaamadaha CGM (CGM receiver) ama qalabka Bluetooth-ka ee gudbiya xogta. iPad ay degmada dugsigu leedahay ayaa lagu hayn doonaa rugta caafimaadka ee dugsiga ama waxaa hayn doona shaqaalaha dugsiga ee loo magacaabay si loogu isticmaalo wadaagista xogta iyo in lala socda xogta waqtiga-dhabta ah (real-time) (waxaana loogu yeeraa "Monitoring iPad"). Arday badan ayaa lagula socon karaa isla qalabka dugsiga.

_____ Waxaan oggolahay inaan u diyaariyo martiqaad elektaroonig ah kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga anigoo adeegsanaya barnaamijka wadaagista xogta ee CGM (tusaale ahaan, Dexcom), kuna diro iimaylka rugta caafimaadka oo ay i siiyay kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga ardaygayga. Shaqaaluhu kalama socon doonaan heerka sonkorta dhiigga ee ardaygayga qalabkooda gaarka ah.

_____Waxaan fahamsanahay in degmadu ay u oggolaan doonto ardayga inuu isticmaalo khadka intarneetka ee degmada. Waxaan fahamsanahay in helitaanka adeeggan la socodka uu ku xiran yahay helitaanka iyo sida ay u shaqeyso khadka Wi-Fi-ga ee degmada. Degmadu ma bixiso wax dammaanad, ballanqaad, ama hubin ah oo ku saabsan helitaanka xogta intarneetka inta lagu sugan yahay xarumaha WCSD ama meel kale.

_____Waxaan fahamsanahay in ardayda haysta qalab awood u leh inuu wadaago xogta ay, marka ay ku habboon tahay, si toos ah ula wadaagi karaan xogta waqtiga-dhabta ah (real-time) waalidka/masuulka, iyadoo ay ku xiran tahay helitaanka khadka ama qorshaha adeega intarneetka ama khadka ee ardayga. Waalidka/masuulka ayaa si toos ah ula xiriiri kara shaqaalaha rugta caafimaadka isagoo farriin qoraal u diraya Qalabka La Socodka (Monitoring iPad) ama wacaya rugta caafimaadka. Si loo sii xoojiyo xiriir hufan oo wax ku ool ah, farriin kasta oo qoraal ah waa in la raaciyaa wicitaan taleefan oo loo diro xafiiska dugsiga ama rugta caafimaadka. In si toos ah loola hadlo shaqaalaha dugsiga ayaa ah habka ugu wanaagsan ee lagu hubin karo in fariinta lagu helo waqtigeeda ku haboon.

[1] Talooyinka ugu dambeeyay ee hadda la isticmaalo waxay ku taariikhaysan yihiin Juun 20, 2024.

Degmo Dugsiyeedka Magaalada Westerville

Heshiiska La Socodka Heerka Sonkorta Dhiigga ee Joogtada ah ee Lagala soconaya Khadka (Remote Continuous Glucose Monitoring)

_____Waxaan oggolahay inaan la shaqeeyo kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga si loo dejiyo qorshe isgaarsiineed oo lagu bixiyo warbixinno waxtar leh oo ku saabsan isbeddellada heerka sonkorta dhiigga inta lagu jiro maalinta dugsiga, haddii loo baahdo, iyo in la isla meel dhigo waxa laga filayo inta jeer ee xiriirkaas la sameynayo.

_____Waxaan fahamsanahay in shaqaalaha dugsiga, oo ay ku jiraan kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga iyo shaqaalaha tababaran ee loo igmaday, ay ka jawaabi doonaan digniinaha muujinaya heerarka sonkorta dhiigga ee hooseeya ama sareeya, halkii ay si joogto ah ula socon lahaayeen isbeddellada iyo tirooyinka mar kasta is beddelaya. Setinka digniinaha ee Qalabka La Socodka (Monitoring iPad) iyo habraacyada la raacayo waxaa loo dejin doonaa si waafaqsan amarrada bixiyaha daryeelka caafimaadka iyo sida lagu qeexay qorshaha daryeelka caafimaadka ee gaarka ah ee ardayga. Bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka waxay ku dari karaan fallaaraha muujinaya isbeddelka (trend arrows) tubta daaweynta, waalidka/masuulkuna wuxuu ku dari karaa fallaarahan si ay u hagaan daaweynta, iyadoo lagu qeexayo qorshaha daryeelka caafimaadka gaarka ah ee ardayga oo lala diyaariyey kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga.

_____Waxaan fahamsanahay in waalidka/masuulka uu mas'uul ka yahay dejinta digniinaha qalabka CGM iyo inuu ku wargeliyo kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga cabbirka la dejiyay. Digniinaha waa in loo dejiyaa heerarka sonkorta dhiigga ee hooseeya iyo kuwa sareeya marka loo baahan yahay daaweyn/tallaabo in la qaado. Tani waxay ka caawin doontaa ardayga inuu ka fogaado daalka ka dhasha digniinaha soo noqnoqda (alarm fatigue), waxayna kor u qaadi doontaa waxbarashadiisa iyo ka qayb-qaadashadiisa. Digniinaha soo noqnoqda ama waxqabadyada la xiriira akhriska dareemaha CGM waxay carqalad ku keeni karaan waqtiga waxbarashada ee ardayda.

_____Waxaan qirayaa in ardaygaygu uu ka warqabo digniinaha CGM, in digniinahaas ay sii ahaan doonaan kuwo shaqaynaya, isla markaana uu fahamsan yahay inuu oggeysiiyo macallinkiisa, kalkaalisada caafimaadka ee dugsiga, ama shaqaale kale oo ka tirsan WCSD marka digniinta ay dhawaaqdo.

_____Waxaan fahamsanahay in kalkaaliyeyaasha caafimaadka ee dugsiga iyo shaqaalaha rugta caafimaadku ay ku dadaali doonaan intii karaankooda ah inay khadka kala socdaan akhriska qalabka CGM. Si kastaba, shaqaalaha dugsigu waxay mas'uul ka yihiin ilaalinta badbaadada dhammaan ardayda inta ay ku sugan yihiin goobta dugsiga. Degmadu ma dammaanad qaaddo in la socodka joogtada ah ee khadka oo mar walba suurtagal noqon doono, sababo la xiriira culayska shaqada ee rugta caafimaadka, waajibaadka kale, ama marka ay xaalad deg-deg ah dugsiga ka dhacda. Waxaan qirayaa in uusan jirin shaqaale ka tirsan WCSD oo mas'uul ka ah ama si joogto ah ula socon doona heerka sonkorta dhiigga ee ardaygayga iyadoo la adeegsanaya Abka.

Saxiixayga hoose wuxuu caddeynayaa inaan qirayo, fahamsanahay, isla markaana oggolahay dhammaan shuruudaha kor ku xusan. Heshiiskani wuxuu dhaqan-gal ahaan doonaa hal sano-dugsiyeed, waxaana joojin kara waalidka/masuulka wakhti kasta.

Magaca Waalidka/Mas'uulka: _____

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka:_____ Taariikhda: _____

Magaca Kalkaalisada Caafimaadka ee Dugsiga:_____

Saxiixa Kalkaalisada Caafimaadka ee Dugsiga:_____Taariikhda: _____